



## Baahida iyo Hadafka Barnaamijka

Wadooyinka xaafada Phillips waxa ay leedahay shilal gawaari oo badan oo keena dhaawacyo culus iyo dhimashaba. 10 kii sanno oo la soo dhaafay, waxaa ka dhacay in ka badan 1,600 oo shilal gawaari ah wadooyinka. Hadafka barnaamijku waa in lagu yareeyo xawaaraha gaadiidka laguna bilo amaanka wadooyinka. Ka soo bixida laga soo baxayo hadafyadaasi waxa ay ka dhigi wadooyinku kuwo raaxo badan u yeesha dadka lugta ah, kuwa ku orda alwaaxa lugaha leh ama gawaarida wata.

## Aaga Barnaamijka



## Shilalka goob walba (2011-2020)



## Tirada shilalka ee Socdaalada kala duwan (2011-2020)

24th Street	398	8	23
26th Street	544	23	20
28th Street	571	42	26

Wadooyinkaasi waxa ay leeyihiin shilal 95% ka badan shilalka wadooyinka Minneapolis.

## SABABTA barnaamijka loo doortay?

Sannadahii 2017 iyo 2018, Magaaladu waxay daraasad ku samaysay macluumaad ku saabsan 10-sanno oo shilal ah si ay u wargeliyaan hawlaha mustaqbalka. Daraasadani waxa ay cadeysay in shilal badani ay ka dhacaan Xaafada Phillips Neighborhood. Shilalkaasi waxay keenaan dhaawacyo iyo xataa dhimasho. Barnaamijka waxa uu qayb ka yahay Hadafka Baa'binta ee Araga Magaalada si looga hortago dhaawacyo cul-culus iyo dhimasho ka dhalata shilalka gawaarida.

## XAGEE ayey ka dhacayaan?

Magaaladdu waxa ay bilaabaysaa ku taxa-luqid iyo dib u habayn ay ku sameynayso afar wado oo dhaawac badani ka dhacaan

- **Chicago Avenue**
  - 24th Street ilaa 28th Street
- **24th Street E**
  - I-35W ilaa Hiawatha Ave
- **26th Street E**
  - I-35W ilaa Hiawatha Ave
- **28th Street E**
  - I-35W ilaa Hiawatha Ave

## GOOMA weeye dhisidu?

Magaaladu wax ay rabtaa inay sameyso hagaajino amaanka gaadiidka ah oo si gaar ah loo bartilmaameedsaday laga bilaabo 2024.


## SIDDEE ayaan ula wadaagi karaa ra'yigayga?

Wax badan ka ogow barnaamijka, la wadaag ray'igaaga, iskana qor si aad u hesho akhbaar kale oo ku saabsan barnaamijka shabakada:

[minneapolismn.gov/projects/phillips/](https://minneapolismn.gov/projects/phillips/)




## Jadwalka Barnaamka



## Wadooyinka laga Yaabo in wax laga Qabto

Barnaamijku waxa uu xooga saari doonaa goobaha baahida ugu weyn ay ka jirto iyadoo lagu salaynayo talada dadka deegaanka iyo macluumaadka shilalka Shaqaalaha Magaaladdu waxa uu la shaqeyn doonaa dadka deegaanka si loo bayaamiyo walaacyadooda iyo hadafyadooda ku saabsan wadooyinka. Hoos waxaa ku qoran meelaha laga yaabo in barnaamijku wax ka qabto:

### Isku keeniyadu




Isku keenidu waxay soo koobaan wadooyinka, iyadoo u abuuraya goyn amaan ah oo kooban dadka lugta ah.

### Laynka Baayga -ee Kaabadu Ilaaliso



Laynka baayga ee kaabadu ilaaliso waxay abuuraa gaashaan u dhexeeya baygaga iyo gawaarida.

### Munaarada Degdeg u Seenyaalaynaysa



Nalalka seenyaalaynaya, calaamadaha waxay u sheegaan dadka gawaarida wada in dadka luga ahi ay wadada goynayaan.

### Dhexda



Dhexdu waxay siisaa ilaalin baygalaaysha iyo dadka lugta ah ee wadada goynaya.

Wixii maciin macquulka ah ama qaab kale ah, fadlan kala xiriir: Mike Samuelson, Waaxda Hawlaha Guud ee Minneapolis ee 612-271-8684 ama [jerome.joiner@minneapolismn.gov](mailto:jerome.joiner@minneapolismn.gov)

Dadka dhaga la' ama dhagaha culus waxay isticmaali karaan adeega lalinta warka ee la waco ee 311 iyo khadka 612-673-3000. Isticimaalayaasha aalada TTY ha wacaan khadka 612-673-2157. Para asistancia 612-673-2700 - Rau kev pab 612-673-2800 - Hadii aad Caawimaad u baahantahay 612-673-3500